

Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial




Waxa aan ka baranay nadiifiyayaasha ee ku saabsan bad-qabka goobta shaqada

Arrimo kala duwan ayaa wiiqa baq-qabka goobta shaqada ee nadiifiyaha. Si wax looga qabto halisyadan bad-qabka ee faraha badan, waxaan ku talineynaa hirgelinta barnaamijka hogaaminta bad-qabka.

Mudnaan siinta hogaaminta bad-qabka waxay sare u qaadaa caafimaadka iyo fayo-qabka nadiifiyaha, waxtarka shaqada, waayna qiima jaban tahay waqti dheer kadib.

Hadafkeenu waa inaan bixino aqoon ganacsi oo habboon oo ay shirkadahu u adeegsani karaan inay ku horumariyaan xirfadaha hogaaminta bad-qabka.



Aqoonta bad-qabka ee maamulaha iyo kormeeraha, heeganaanta iyo wada-xiriirka, oo ay hormuud ka yihiin xiriirada ixtiraamka leh ee lala yeesho shaqaalaha waxay abuuraan xaalado shaqo oo udub dhexaad u ah yarenta dhawaacyada goobta shaqada ee suuragalka ah.

Taxanahan waxay ujeedadiisu tahay in la bilaabo wadahal ku saabsan sida xiriirada goobta shaqada ay sameyn ugu yeeshaan waxtarka, bad-qabka iyo fiyoobida shaqaalaha.

Cilmi baarisa ayaa lagu oggaaday in tabbabarka lala beegsado maamulka iyo kormeerka uu waxtar wayn u leeyahay yareynta dhaawacyada goobta shaqada marka lala barbardhigo in kaliya diirada la saaro tababarida shaqaalaha.

Wada xiriirka bad-qabka oo liita ama aan ka dhex jirin maamulka iyo shaqaalaha dhexdooda waxay sababi kartaa isku dhacyo taxana ah oo horseeda dhaawac.

Tusaale ahaan, Erick wuxuu nadiifinayaa dhulka wuxuuna arkay in xaqiinka uu kala daadanayo. Wuxuu kormeerahiisa u diray sawirka xaaqinka wuxuuna ka codsaday in laga baddelo. Wax jawaab ah kama uusan helin. Toddobaad ayaa laga soo gudbay oo Erick dhabar xanuun ayaa ku bilawday uu ka qaaday xaaqidi oo sidi hore ka adkaatay xaaqinka kala daadanayo aawadeed. Shaqada oo ku badan aawadeed Erick kama tagi karo shaqada si uu ula hadlo kormeerahiisa. Wuxuu kaliya raja ka qabaa inay isku soo dhacaan niska uu shaqdiisa ku jira, balse nasiib uma yeelan.

Dhowr toddobaad kadib, Erick wuxuu xareystay dalabka magdhawga shaqaalaha sababta oo dhabar xanuunkiisa ayaa aad u sii daciifinayay. Kadib markuu xareeyay, kormeerahiisa ayaa u wacay wuxuu ka wareystay dhaawaciisa. Erick wuxuu sharraxay in is-culeysiinta xad dhaafka ah ee ka dhalatay xaaqinka xun ay sababtay dhabar xanuun daran. Kormeerahiisa wuxuu sheegay in xaaqimada gaarka ah ee ay soo iibsadaan ay dhamaadeen oo xaqin cusub la dalbay. Erick wuxuu sheegay in dhakhtarkiisa uu kula talinayo inuu nasto ama shaqada u baddesho hawlo aan dhabarkiisa wax usii dhimeynin.

Wuxuu rajeenayaa in kormeerahiisa uu ka soo hadlo daahida mardhaw oo uu u baddelo hawlaha shaqadiisa si uu kaga badbaado dhaawac. Wicitaanka kadib, Erick wuxuu ka xanaaqay tixgelin iyo wada-xiriir la'aanta kormeerahiisa wuxuuna ku dhaartay inuu shaqo ka codsadan doono shirkad tartan kula jirta midooda.

Isku-dhacyada dadka dhaxdooda waxay a buuraan caqabadaha shaqada, waxay yareeyaan waxtarka waxayna sare u qaadaan dhaawacyada suuragalka ah ee goobta shaqada.

Maxaa diirada loo saarayaa xiriirada dadka ka dhaxeeya?

Kormeerayaasha ku xalliya arrimaha waqti sax ah waxay gacan ka geystaan xasilinta fayyo-qabka shaqaalaha iyo awooda ay u leeyihiin inay u qabtaan hawlaha qaab hufan oo ammaan leh.


Nadiifiyeyaasha ku jiray wareysiyadeena kooxaha iyo wareysiyadeena shaqsiyaadka waxay nala wadaageen wayo-aragnimadooda shaqada. Isku-dhacyada dadka dhaxdooda iyo wada-xiriirka adag ee ka dhaxeeya kormeerayaasha iyo shaqaalaha waxaa inta badan la soo sheegaa inay jawi shaqo oo walwel leh u abuurto qof walba. Dhageysiga wanaagsan ee kormeeyaasha waxay u egtahay inay dhaliso bad-qab wayn, sababta oo ah waxay tixgelin siisaa aragtiyada qiimaha leh ee shaqaalaha.

Kormeerayaasha loo qalabeeyay inay koox hogaamiyaan oo ay wax ka qabtaan walaacyada bad-qabka, sidoo kale waxay u egtahay inay keento xiriir shaqo waxtar leh, hufan, oo faa'iido dhinac walba leh. Dadaalka maamulka ee lagu dhiso jawi shaqo oo bad-qabka xooga saara ayaa ah danta ugu weyn shirkada ee guusha raagta.

Hogaaminta caafimaadka iyo bad-qabka goobta shaqada waxay ka hortagtaa noocyo badan oo ah khataraha goobta shaqada, sida:

Kiimikooyinka

- Finanka maqaarka



Khataraha jireed

- Simbixada, kufitaanka, iyo dhacitaanka



Arrimaha wanaajinta goob-shaqeedka

- Qaadista waxyaabaha culus ee lagu qaado joog qaab daran



Waxyaabaha nool

- Dhacdada afka cirbadaha



Cawaaqiibta cilmu-nafsiga – ee ka dhasha walwelka shaqada

- Walaac
- Niyad jab
- Daalka shaqada



Qof kasta wuxuu door muhiim ah ku leeyahay ka dhigida bad-qabka mudnaanta koowaad ee shaqada, shaxda hoose waxay muujineysaa mawduucyo kala duwan oo la xiriira mas'uuliyada xirfadlayaasha.

